

# *Diiq-Yare wuu socdaalay*



*Chicken Little goes for a walk  
(Somali)*

*'Lemos' Multilingual Books Project*

Reading materials for children and school

Series editor: John Hajek

The books in this series are early readers designed to help children enjoy reading.

**Diiq-Yare wuu socdaalay (Chicken Little goes for a walk)**

Language: Somali

Based on a traditional folk story from south Sulawesi as retold by Murti Bunanta in *Si Kecil Berjalan-jalan* (2004)

Adapted and translated by Ali Mumin Ahad and John Hajek

All drawings by Katrina Langford

Published by RUMACCC

Research Unit for Multilingualism & Cross-Cultural Communication  
The University of Melbourne, Victoria 3010  
Australia  
[www.rumaccc.unimelb.edu.au](http://www.rumaccc.unimelb.edu.au)

Copyright © 2013 John Hajek

All rights reserved

ISBN 978-1-921944-60-4 (black and white edition)

ISBN 978-1-921944-61-1 (colour edition)

These books can be downloaded for free use from the publisher's website  
[www.rumaccc.unimelb.edu.au](http://www.rumaccc.unimelb.edu.au).

They may not be published for sale without the express written consent of the editor (contact: [rumaccc-info@unimelb.edu.au](mailto:rumaccc-info@unimelb.edu.au)).



## 1. (kow)

**Fiiri, waa dooro. Taasi waa Diiq-Yare hooyadiis. Diiq-Yare hooyadiis hori iyo gadaal bay u socotaa, waxayna u yeeraysaa Diiq-Yare, balse Diiq-Yare ma uusan imaan.**



## 2. (labo)

**Diiq-Yare hooyadiis waxay u sheegtay Diiq-Yare aabbihiis. Labadoodiba toos bay u dhaqaaqeen iyagoo doondoonaaya canuggooda.**



### **3. (saddex)**

**Diiq-Yare adeerkiis iyo eeddadiisba waa ay ka walaacsanyihiin. Eeddo saxiibteedna waxay doonaysaa in ay caawiso. Saddexdii dooroba waxay u dhaqaaqeen Diiq-Yare raadintiisa.**



#### **4. (afar)**

**Mid waliba waa uu maqlay habowga Diiq-Yare. Afar dooro oo ah saaxiibbadii Diiq-Yare aabbihiis, iyaguna waxay doonayaan in ay ku caawiyaan doondoona Diiq-Yare.**



## 5. (shan)

**Qorraxdu waa ay sii dhacaysaa, welise lama helin Diiq-Yare. Shan dooro oo kale waxay ku soo darsoomeen doondoona. Laga yaabe in ay iyagu helaan Diiq-Yare.**



## 6. (lix)

**Balse, Diiq-Yare weli lama helin. Haddeer dooro waliba waxay ku soo biirtay doondoona Diiq-Yare. Waxaa la arkaa lix dooro oo isla ciyaayo, oo intoodaba u dhawaaqayo Diiq-Yare.**





**Xaggee buu aaday Diiq-Yare? Durbadiiba, si lama filaan ah... Diiq-Yare codkiisii baa la maqlay, “jiip-jiip-jiip”. Agah, waa kan! Meel fog waxaan ka aragnaa Diiq-Yare oo u soo ordaayo xagii uu guriga ka xigay – isaga oo faraxsan. Waxaad mooddaa in uu u kicitamay xagga guriga Adeer Barre. Diiq-Yare wuxuu la cayaarayey Shambi-Boorre, adeer Barre mukulaalkiisa, oo wuuba iska illaabay in uu dib ugu soo noqdo guriga. Isagu waa dheel badanyahay!**



**Aabbe iyo hooyo waa ay ku farxeen araggiisa. Nasiib-wanaag, Diiq-Yare ma uusan habaabin.**



**Hooyo waxay ku tiri: “Diiq-Yare, kolka xiga i waydii intaanad socod u dhaqaaqin!”  
“Waa yahay, hooyo”, ayuu ku yiri Diiq-Yare.**